Laga bilaabo gu'ga 2020 sharciga ku xeeran ku deeqida xubinta ee gudaha Ingiriiska wuu isbeddelayaa

Warqad xogeedkan waxay sharraxaysaa xulashooyinkaaga

Waa maxay ku deeqida xubinta iyo nudaha?

Ku deeqida xubinta iyo nudaha waa bixinta xubnahaaga iyo/ama nudahaaga si aad gacan uga gaysato badbaadinta ama wanaajinta nolosha dadka kale marka aad dhimato.

Hal ku deeqe xubin wuxuu badbaadin ama isbeddel ku sameyn karaa nolosha ilaa sagaal qof. Ku tallaalida nudaha ayaa sidoo kale si weyn u wanaajin kara tayada nolosha ee qofka. Tani waxay noqon kartaa xuubka dahaarka isha ka caawin kara qof inuu wax arko mar labaad, beddelida qobobka wadnaha si loo daaweeyo cillad wadne, ama maqaar si loo daaweeyo gubashada daran.

Maxay tahay sababta sharciga ku xeeran ku deeqida xubinta loo beddelayo?

Qiyaastii saddex qof ayaa dhinta maalin kasta guud ahaan Boqortooyada Ingiriiska iyagoo u baahan xubin, waayo xubno ku filan lama heli karo si loogu tallaalalo. Balse kaliya 1% dadka ayaa u dhinta duruufo taasoo u saamaxdo inay ku deeqaan.

Dadka badankood waxay taageeraan ku deeqida xubnaha mabda' ahaan waxayna diyaar u yihiin inay ku deeqaan xubnahooda dhimashadooda ka dib. Si kastaba ha ahaatee, dad badan ma aysan caddeyn go'aankan iyagoo saxiixaya gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS ama u sheegaya qoyskooda. Beddelida sharciga wuxuu si wanaagsan uga tarjumayaa waxa dadka badankooda rabaan inay dhacaan wuxuuna gacan ka geysan doonaa badbaadinta iyo wanaajinta nolol badan.

Maxaa isbeddelaya?

Laga bilaabo gu'ga 2020, dhammaan dadka waaweyn ee jooga Ingiriiska waxaa loo tixgelin doonaa inay oggolaadeen inay noqdaan ku deeqe xubin ama nudaha marka ay dhintaan haddii aysan qorin go'aan ah inaysan ku deeqin ama aysan ku jirin mid ka mid ah kooxaha laga reebay (eeg 'Yuu isbeddelkan saameyn doonaa?'). Tani waxaa badanaa loo yaqaan nidaamka 'ka baxida'.

Tani waxay la macno tahay haddii aadan xaqiijin inaad rabto inaad noqoto ku deeqe xubin iyo in kale – adigoo ku qorayo go'aan gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS ama adigoo la hadlaya u sheegaya iyo qoyska – waxaa loo tixgelinayaa inaad oggolaatay inaad ku deeqdo xubnahaaga marka aad dhimato.

Ku deeqida xubinta ayaa weli ah ficil deeqsinnimo ah. Waxaad wali xaq u leedahay inaad doorato inaad noqoto ku deeqe xubin iyo in kale. Coyskaaga waa lagala tashanayaa ku deeqida xubnahaaga marka aad dhimato.

Goorma sharciga ku xeeran ku deeqida xubinta la beddelayaa?

'Hanaanka ka bixida' wuxuu ka dhaqangalayaa gudaha Ingiriiska laga bilaabo gu'ga 2020.

Ilaa iyo markaa, haddii aad u dhimato duruufo laga yaabo inaad awoodo inaad ku deeqdo, hawl-wadeenada caafimaadka ee takhasuska leh ayaa sii wadaya inay hubiyaan Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS si ay u eegaan inaad qortay go'aan aad ku noqoto ku deeqe. Haddii aad qortay, markaa qoyskaaga ayaa la weydiin doonaa inay tani ixtiraamaan. Haddii aadan isku qorin ku deeqe ahaan, qoyskaaga waxaa la weydiin doonaa inay qaataan go'aan iyagoo ku matalaya.

Mar haddii sharciga la beddelo waxaa loo tixgelinayaa inaad oggolaatay inaad noqoto ku deeqe xubin haddii aad ka weyn tahay 18 jir oo:

- aadan 'ka bixin', ama
- aadan ku jirin koox laga reebay

Qoyskaaga wali wuu ku lug yeelan doonaa.

Yuu isbeddelkan saameyn doonaa?

Sharciga cusub ayaa lagu dabaqi doonaa dadka waaweyn ee jooga Ingiriiska, kuwaasoo sidoo kale ku dhinta gudaha Ingiriiska.

Laguma dabaqi doono:

- dadka ka yar 18 jir
- dadka aan laheyn awood maskaxeed ay ku fahmaan qorshayaasha cusub iyo qaadida tallaabada lagama maarmaanka ah
- dadka ku noolaa gudaha Ingiriiska wax ka yar 12 bilood ka hor dhimashadooda
- dadka aan halkan ugu nooleyn si iskood ah

Maxay tahay inaan sameeyo?

Maadaama sharciga ku xeeran ku deeqida xubinta isbeddelayo gudaha Ingiriiska laga bilaabo gu'ga 2020, Waxaan rabnaa in qof walba go'aansado inuu doonayo inuu noqdo ku deeqe xubin iyo inuu go'aanka la wadaago qoyskiisa.

Haddii aad rabto inaad noqoto ku deeqe xubin, waxaad ku qori kartaa si aad u noqoto ku deeqe gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS.

Haddii aadan rabin inaad noqoto ku deeqe xubin, waad ka bixi kartaa adigoo ku qorayo go'aan 'diidmo ku deeqid' gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS.

Haddii aad mar hore ku qortay go'aankaaga gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta oo go'aankaagu sidiisa ahaado waa inaad u sheegto qoyskaaga waxa aad rabto.

Haddii aad mar hore qortay, balse **aad rabto inaad beddesho go'aankaaga qoran**, waxaad si fudud u samayn kartaa arrintan wakhti kasta adoo ka buuxinaya foomka 'dib-u-xaqiiji qabaarkaaga' onlaynka.

Waa maxay Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS?

Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS waa keyd xogeed ammaan ah oo haya qabaarka dhammaan dadka qoray go'aan ku saabsan ku deeqida xubinta. Waxaa ku qoran inuu qofka doonayo inuu noqdo ku deeqe xubin iyo nudaha iyo haddii kale. Dadka raba inay ku deeqaan, wuxuu dhigayaa nooca xubinta iyo nudaha ay rabaan inay ku deeqaan. Diiwaanka waxaa kaliya heli kara hawlwadeenada takhasuska leh ee NHS.

Ku qorida go'aankaaga gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS iyo u sheegida qoyskaaga waxa aad rabto waa hababka ugu fiican ee gacan looga gaysto hubinta in go'aankaaga la ixtiraamo.

Xusuusnow, haddii aad ka weyntahay 18 sano jir marka aad dhimato, aadan ku jirin koox laga reebay oo aadan ka bixin, waxaa loo tixgelinayaa inaad oggoshahay inaad noqoto ku deeqe xubin iyo nudaha.

Wax kasta aad doorato, waxaa muhiim ah inaad u sheegto qoyskaaga si ay u taageeraan go'aankaaga. Waa inaad sidoo kale u sheegtaa iyaga haddii aad beddesho go'aankaaga mustaqbalka.

Si aad u qorto go'aankaaga booqo organdonation.nhs.uk

Miyaa wali qoyskayga la weydiin doonaa wax ku saabsan ku deeqida xubinta ka dib gu'ga 2020?

Haa. Qoyska ku deeqaha suurtagalka ah mar walba waa loo tagi doonaa si loogala hadlo fursadaha ku deeqida xubnaha iyo nudaha. Tani waxay gacan ka gaysanaysaa hubinta in go'aan kasta oo lagu qoro Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS uu yahay go'aankaaga ugu dambeeya ee la ogyahay. Kalkaaliyaha takhasuska leh ayaa la shaqeyn doona qotska si looga caawiyo hubinta in tani la taageero.

Qoyskaaga ayaa noo sheegi kara wixii ku saabsan codsiyo ama shuruudo gaar ah oo laga yaabo inaad qabtay si aad gacan uga gaysato hubinta in ku deeqida xubnahaaga ay lsii socdaan iyadoo la raacayo iimaankaaga ama waxaad aaminsan tahay.

Qoyskaaga wuxuu bixiyaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan taariikhda caafimaadkaaga, safarkaaga iyo taariikhdaada bulsheed sidoo kale. Macluumaadkan wuxuu gacan ka gaystaa hubinta in xubnahaaga si badqab ah loo siin karo qof kale.

Raadi faahfaahin intaas ka badan oo ku saabsan xulashooyinka

Waxaa jira macluumaad badan oo waxtar leh oo ku saabsan ku deeqidda xubinta iyo nudaha oo ku yaala websaydka:

organdonation.nhs.uk iyo baraha bulshada **@NHSOrganDonor**

Marka aad gaarto go'aankaaga, waxaa muhiim ah inaad ku qorto gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS oo aad u sheegto qoyskaaga xulashadaada

Haddii aadan ka heli karin waxa aad u baahan tahay websaydka ama aadan wali hubin, waxaad wici kartaa khadkayaga caawinta ee heeganka ah:

0300 303 2094

Hadduu maqalku ku dhibayo fadlan adeegso adeegayaga gudbinta qoraalka:

18001 0845 730 0106

Si aad u adeegsato isla sheekeysiga qoraalka ah fadlan u dir fariin gaaban:

07860 034 343

Laga bilaabo 1 Maayo 2019, qof kasta oo heli kara App-ka NHS wuxuu sidoo kale awoodi doonaa inuu u isticmaalo inuu ku qoro go'aankiisa gudaha Diiwaanka Ku Deeqida Xubinta ee NHS.

Waxaad ka soo dejisan kartaa App-ka NHS gudaha App Store ama Google Play.

Download on the App Store

GET IT ON Google Play

Hilaria waxay sugaysay toban sano tallaalida kellida. Waxay tiri: “Markii la i soo wacay waxay ila noqotay mucjiso. Ma garanayo si aan ugu mahadceliyo ku deeqahayga i siiyay fursad labaad ee nolosha.”